

Översättning till somaliska av artikeln ”Svårt för anhöriga utan pass att få uppehållstillstånd i Sverige” som publicerades på Migrationsverkets webbplats den 11 mars 2010.

Waa ay adag tahay dadka qaraabada ah oo aan baasaboora wadan in ay oggolaanshaha degganaanta dalka Iswiidan ka helaan

Migrationsöverdomstolen [Maxkamadda sare ee arrimaha socdaalka] waxay laba xukun oo cusub ku caddaysay in baasaboora lagu xiro qaraabada sharci deggaansho ka codsanaya dalka Iswiidan. Taasi waxay xataa khuseysaa dadka ka yimaada dalal ay caadi ahaan adag tahay ama aysan suurtagal ahayn in laga gooyo baabasboora la aqoonsan yahay dalka Iswiidan tusaale ahaan Soomaaliya.

Taas micneheedu waxa weeye in ay aad ugu adkaaneyso qaraabada aan baasaboora la aqoonsan yahay sidan in ay la midoobaan qoysaskooda dalka Iswiidan ku sugan. Waxaase jira fursado kooban oo ay carruurto ku la midoobi karaan waalidkood.

Baaritaanka DNA — waa fursad

Iyadoo la samaynayo baaritaan DNA ayaa waxaa lagu xaqiijin karaa in ilmo uu yahay ilmihii uu dhalay waalid dalka Iswiidan ku sugan. Sidaas oo kale ayaa loo xaqiijin karaa haddii qof dal kale ku sugan uu waalidkii yahay ilmo ku sugan dalka Iswiidan. Baaritaanka DNA wuxuu keenayaa aqoonsiga la sugo si ilmo ama waalid ay sharci degganaansho loo siiyo.

Migrationsverket [Hey'adda Socdaalka] wuxuu mararka qaarkood bixiyaa baasaboorka shisheeyaha oo loo yaqaan främlingspass oo la siiyo dadka aan baasaboora ka wadan dalkooda hooyo. Laakiin taasi ma khuseyso qaraabada ku sugan dalkooda hooyo, maxaa yeelay baasaboorka shisheeyaha looma gooyo dad shisheeye ah oo ku sugan dalkooda hooyo.

Waa shuruud in baasaboora la haysto, aqoonsigana la caddeeyey

Sida ku qoran xeerka arrimaha shisheeyaha, waa in dhammaan dadka shisheeyaha ah ay wataan baasaboora ay ku soo galaan kuna joogaan dalka Iswiidan. Migrationsöverdomstolen waxay go'aamisey in shuruudda baasaboora-wadashadu ay khuseyso dhammaan dadka shisheeyaha ah – haddii aysan sharciga ku qonayn sabab cad oo looga reebo.

Ujeeddada shuruudda haysashada baasaboorku waxaa ka mid ah in dhammaan dadka sharci degganaansho ka hela dalka Iswiidan ay caddeeyaan aqoonsigooda. Waxaase jira kooxo sharcigu u fududeeyey – kuwaas oo sharciga degganaanshaha la siin karo inkastoo aan la caddayn aqoonsigooda – waxaana ka mid magangelyo-doonka, dadka baahi u qaba in la badbaadiyo iyo aqoonsiga laga soo qaato xeryaha Qaramada Midoobay.

Qaasho go'aan sharci ah

Iyadoo uu tixraacayo go'aamada Migrationsöverdomstolen ayuu madaxa waaxda sharciga Mikael Ribbenvik go'aan ku gaaray in shuruudda baasaboorka iyo caddayn aqoonsi. Wuxuu caddeeyey in shuruudda lagu xirayo baasaboorka iyo caddayn aqoonsi ay khuseyso dhammaan arrimaha la xiriira sharciga degganaanta.